

## Mawduuc Doorashada & Mawduuca wayn ee laga hadlayo 2022-2023

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

Sanad kasta, National History Day waxay leedahay mawduuc laga hadlo. Ardaydu waa inay ku xidhaan mawduucyadooda macduuca wayn ee laga hadlayo. Mawduucu markasta waa mid ballaadhan. Ardaydu waxay ka baadhi karaan mawduuc kasta taariikhda maxalliga ah, ta gobolka, ama ta adduunka. Mawduuca Maalinta Taariikhda ee 2023 waa &quot; **Xuduudaha Taariikhda: Dadka, Goobaha, Fikradaha.** &quot;

Ardaydu waxay marka hore ka fekeri doonaan qalabka ama teknoolajiyadda aan ku wada xiriiri jiray, sida adeega boostada ee Pony Express ama hindisida taleefanka. Xusuusnow in isgaadhsiintu ay u dhici jirtay siyaabo badan oo kala duwan, sida khudbadaha, farshaxanka, faashiyoona, ama mudaaharaadyada. Isgaadhsiintu waxay had iyo jeer qeyb muhiim ah ka ahayd taariikhda.

### Talooyin ku saabsan doorashada Mawduuc

- **Xiisaha:** Ardaydu waa in ay doortaan mawduuc xiiso galiya iyaga. Waxay ka shaqayn doonaan mashruucoda History Day ah muddo dhawr bilood ah.
- **Xadaysan:** Ardaydu kaliya waxay isticmaali karaan mashruuca gudahiisa tiro kalmado ama wakhti ah oo xaddidan . Mawduuc cayiman ayaa u fududaan doona ardayda in ay cilmi baadhis ku sameeyaan soona bandhigaan. Tusaale ahaan: Dagaalka Sokeeye aad ayuu u wayn yahay mawduuc ahaan. Hase ahaatee, Dagaalkii Antietam-ku waa mawduuc aad u khaas ah oo ka mid ah Dagaalka Sokeeye.
- **Ku xidh mawduuca wayn ee laga hadlayo:** Ardaydu waa in ay mawduucoda ku xidhaan mawduuca laga hadlayo.
- **Taariikhda:** Ardaydu waa in ay doortaan mawduuc dhacay taariikhda . waa in aanay soo qaadan dhacdo hadda taagan. Ardaydu waxay u baahnaa doonaan in ay ogaadaan muhiimadda mawduuca. Haddii mawduucu uu yahay mid goor aad u dhawayd dhacay, way adkaan doontaa in la sameeyo tan. Guud ahaan, waxaanu ardayda ku dhiiri galinaa in ay raadiyaan mawduucyo dhacay ugu yaraan 20 sanno ka hor.
- **Cilmi baadhis la heli karo:** Ardaydu waxay u baahnaa doonaan in ay mashruucoda u helaan macluumaad ayagoo ka raadinaya xigashooyin kala duwan. Mawduucyada dhacay taariikhdi qadiimiga ahayd, ama leh xigashooyin ku qoran luuqado kale, waxa laga yaabaa in ay cilmi baadhistoodu adkaato
- **Macalinka la sax ah:** Dugsiyada qaar waxay leeyihiin xeerar dheeraad ah marka la joogo mawduuc doorashada. Kala hadal macalinkaaga wixii macluumaad dheeraada ah.

### Doorka waalidka ama mas'uulka ilmaha

Waalidiinta iyo mas'uulka ilmuhu waa qayb muhiim ka ah geedisocodka mawduuc doorashada . sidee ayaad u caawin kartaa?

- **Ka hadal** mawduuca wayn ee laga hadlayo ee sannadlaha ah
- **Maskax-tuujin** ku samee fikradaha mawduuca
- **Ka caawi** ardayda inay doortaan mawduuc xiiso galinaya iyaga.

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa boggayaga internet-ka, [www.mnhs.org/historyday](http://www.mnhs.org/historyday).

*Sammi Jo Papas*

Sammi Jo Papas  
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka  
National History Day in Minnesota  
samantha.papas@mnhs.org